NATIONELLA KVALITETSREGISTER

## WARBIXIN DARYEELE

### WARBIXIN LOOGU TALOGALAY BUKAANSOCODKA IYO XIGTADA OO KU SAABSAN KAYDKA XOGTA EE DIIWAANNADA GUUD EE TAYADA

Iswiidhan waxaa ka jira in ka badan 100 diiwaan guud oo kala duwan oo ku saabsan tayada daryeelka. Waxaana laga isticmaalaa isbitaallada dhammaantood.

**Hammi**

Diiwaannada Guud ee Tayada waa in:
- ay gacan ka geystaan badbaadinta nafta iyo helidda daryeel caafimaad loo siman yahay
- si firfircoon loogu adeegsado raadraac, barasho, horumarin tayo, wanaajin, cilmibaaris iyo maareyn.

**Ujeeddo**

Ujeeddada laga leeyahay Diiwaannada Guud ee Tayada waxay tahay in daryeelka caafimaad laga dhigo mid loo siman yahay oo tayo sare leh iyo in lagu sugo raacidda tusaalooyinka daryeelka.

**Waxaad gacan ka geysaneysaa wanaajinta daryeelka**

Markaad ka qaybqaadatid Diiwaannada Guud ee Tayada waxaad gacan ka geysaneysaa wanaajinta daryeelka caafimaad ee Iswiidhan oo idil. Ka qeybgalkaaga diiwaanka tayada waa mid aaad u madaxbannaan tahay oo aan saamayn ku yeelan doonin daryeelka aad heleyso. Xogta uu kaa helo wuxuu daryeeluhu uu adeegsanayaa inuu tayadiisa u barbardhigo tayada daryeelayaasha kale ee dalka. Xogta waxaa lagu ogaanyaa hababka shaqo, hababka daryeel iyo daawooyinka ugu natiijada wanaagsan. Natiijada waxaa dabadeed daryeeluhu uu u adeegsanayaa waanjinta hawlihiisa.

Daryeel-bixiyuhu wuxuu uruurinayaa xogta bukaansocodka, isagoo taas u cuskanaya sharciga maareynta xogta bukaansocodka (2008:355). Hadafkeenu waa in, inta karaankeena ah, aan uruurinno xog bukaansocod farabadan – bukaansocod badan oo ka qaybgala diiwaannada guud ee tayada waxay kordhinayaan kalsoonida lagu qabo natiijooyinka iyo fursadaha horumarinta daryeelka.

**Waa tan xogta la diiwaangelinayo**

Xogta laga diiwaangelinayo Diiwaannada Guud ee Tayada waxaa ka mid ah lambarka aqoonsiga, xiriirrada lala yeesho adeegyada daryeeka, cudurrada, noocyada daryeelka iwm. Marmar waxaa iyana la diiwaangelinayaa xog aad ku qorto foomamka su'aalaha ee aad u buuxiso daryeelahaaga.

**Mas'uuliyiinta Diiwaannada Guud ee Tayada**

Annaga oo ah daryeelahaaga ayaa ka mas'uul ah diiwaangelinta xogtaada ee lagu keydinayao Diiwaannada Guud ee Tayada iyo in xogtaasu ay u gasho diiwaannada hab sugan oo lagu

kalsoon yahay. Annaga ayaa sidoo kale ka mas'uul ah xogtaaada markaan u adeegsaneyno hawlaha horumarinta tayada ee noo gaarka ah. Hase ahaatee annagu mas'uul kama nihin diiwaannada tayada. Caadiyan waxaa ka mas'uul ah maamulka gobolka. Bogga www.kvalitetsregister.se waxaad ka arki kartaa gobolka iyo diiwaan-hayaha ka mas'uulka ah diiwaanka xogtaadu ay ku keydsan tahay.

**Waa sidaas sidaan xogtaada u adeegsaneyno**

Xogta ku keydsan diiwaan tayo waxaa loogu talagalay in si joogto ah lagu wanaajiyo tayada daryeelka iyo in lagu helo tirakoob. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa cilmibaaris, laakiin waa in marka hore ruqso laga helaa Hay'adda Ilaalinta Anshaxa (Etikprövningsmyndigheten). Si la isugu dubbarido loona helo macluumaadka waxaan adeegsanaa ka sokow lambarkaaga aqoonsi ereyo gaar ah oo wax lagu raadiyo. Marmar waxaa la is waafajiyaa macluumaadka laga helo diiwaannada guud ee tayada iyo macluumaadka diiwaannada kale ee ay ku keydsan yihiin macluumaad ku saabsan daryeelka caafimaad iyo dadweynaha.
Marka la soo bandhigayo tirakoob laga soo xigtay diiwaan tayo marnaba halkaas lagama akhrisan karayo xog shakhsi u gaar ah.

**Waa dadkaan kuwa wax ka ogaan kara xogtaada gaarka ah**

Waa uun qaar hawlwadeennadeena ka mid ah kuwa diiwaangelinaya xogtaada oo haleeli kara xogtaas koombiyuutareysan. Sidoo kale dad si gaar ah loo xulay oo ka shaqeeya gobolka diiwaannadiisa guud ee tayo ayaa haleeli kara xogta koombiyuutareysan ee bukaansocodka u gaarka ah. Macluumaadka ku keydsan Diiwaan Guud ee Tayo waxaa loo gudbin karaa qof ka baxsan adeegyada daryeellada caafimaad haddii uun la hubo in taas bukaansocodka iyo xigtadiisa uusan marnaba dhaawac ka soo gaareyn. Ficil ahaan cilmibaarayaal uun ayaa heli kara xogta shakhsiga u gaarka ah ee ku keydsan diiwaan guud ee tayo.

**Waa sidaas sida loo ilaalinayo xogtaada**

Warbixinta adiga bukaansocod ahaan kugu saabsan waxaa lagu ilaalinayaa dhawr sharci: qaraarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta shakhsiga, sharciga macluumaadka guud iyo macluumaadka sirta ah iyo sharciga ilaalinta xogta bukaansocodka. Taas micneheedu wuxuu yahay in si adag loo xakameeyo qofka xogtaada heli kara. Xogta waxaa loo ilaalinayaa hab u dhigma sida loo ilaaliyo qoraallada takhtarka ee bukaanka u gaarka ah. Taas waxaa u dheer in la hubiyo in qof aan idan u lahayn uusan marnaba gacanta ku dhigin xogta, in xogtaada lagu ilaaliyo farsamo kombiyuutareed daahsoon iyo in furaha lagu galo keydka kombiyuutareed ee xogta lagu helo hab adag oo nidaamsan.

**Nidaamka sharci ee Diiwaannada Guud ee Tayada**

Dhammaan daadka gacmaha ku haya xog shakhsi waa inay cuskadaan nidaam waafaqsan qaraarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta shakhsiga, xaaladaha qaarkoodna sidoo kale sharciyada Iswiidhan ama dastuur kale. Diiwaannada Guud ee Tayada xagga qaraarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta shakhsiga (art. 6.1 e) waxaa loo arkaa inay ka mid yihiin danaha guud ee bulshada, sidaa darteed waa wax la oggol yahay.

Nidaamka Diiwaannada Guud ee Tayada waxaa u dheer inuu ku qeexan yahay cutubka 7aad ee sharciga maareynta xogta bukaansocodka.

Sidaas dareteed ka shaqeynta xogtaada waxaan annaga iyo gobolka ka mas'uulka ah Diiwaannada Guud ee Tayada u cuskaneynaa sharci. Macluumaadka caafimaadka waxaa loo yaqaan xog shakhsi oo xasaasi ah. Waxay iyaguna u baahan yihiin in sharci loo cuskado. Macluumaadkaas oo kale, maadaama ay lagama maarmaan u yihiin fulinta hawlaha caafimaad iyo helidda daryeel caafimaad, in lagu keydiyo diiwaannada waxaa bannaynaya qaraarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta shakhsiga (art. 9.2 h) iyo sharciga maareynta xogta bukaansocodka.

**Muddada keydinta iyo nidaamka rasaynta**

Xogtaada waxaa diiwaanka laga saarayaa marka laga baahi baxo oo aysan waxtar dambe u lahayn horumarinta iyo sugidda tayada daryeelka. Hase ahaatee Hay'adda Arkiifiyada Gobolka ee ka mas'uulka ah Diiwaannada Guud ee Tayada waxay go'aamin kartaa in xogtaada la keydiyo wakhtiga loo isticmaalayo ujeedooyin taariikheed, tirakoob ama cilmi ahaaneed.

**Xuquuqdaada**

Waaxdaan daryeelka caafimaad xog ayaan ka diiwaangelinaa Diiwaannada Guud ee Tayada. Haddii bukaansocod ahaan aadan dooneynin inaan xogtaada gudbinno waxaad xaq u leedahay inaad doorato inaadan diiwaangelinta ka qeybqaadan. Sidaas hadday jirto u sheeg shaqaalaha ama dib ula xiriir diiwaan-hayaha, eeg warbixinta kor ku qoran.

Waxaad iyana leedahay xuquuq kale;

- Mar allaaleh iyo markaad doonto ayaad xaq u leedahay in xogtaada laga saaro diiwaanka.
- Waxaad xaq u leedahay in laguu xaqiijiyo in gobolka ka mas'uulka ah diiwaan guud ee tayo uu ku talo jiro xogtaada shakhsi ahaaneed inuu keydiyo, hadday sidaas jirtana aad bilaash ku heshid koobiga xogta lagaa keydiyey.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato nooca xirfadlayaasha xogtaada loo fasaxi doono, tusaale ahaan ujeedooyin cilmibaaris. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad ogaato haddii xogtaada laga soo xigtay ilo ka baxsan qoraallada bukaansocodka ama adiga lagaa helay.
- Waxaad xaq u leedahay in xogta aad ku hesho hab elegtroonig ah.
- Waxaad xaq u leedahay in xog adiga kugu saabsan oo khaldan lagaa saxo iyo in la buuxiyo xogta kala dhimman.
- Markay jiraan xaalado qaarkood waxaad xaq u leedahay inaad dalbato in la xaddido hawlaha xogtaada loo adeegsanayo. Tani waxey khuseysaa xilliga la gorfeynayo xuquuqda kale ee aad sheegatay. Xadaynta micneheedu wuxuu yahay in Diiwaannada Guud ee Tayada aysan ku camalfali karin xogtaada markay noqoto wax ka baxsan in la keydiyo.

- Waxaad xaq u leedahay in lagaaga warbixiyo qeybta daryeel uu ka hawlgalo qofka helay macluumaadkaaga iyo xilliga ay taasu ahayd.
- Magdhaw ayaad xaq u leedahay haddii xogtaada loo adeegsaday hab lid ku ah qaraarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta shakhsiga ama sharciga maareynta xogta bukaansocodka.
- Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Hay'adda Kormeerka Keydka Xogta.

**Xiriir**

Haddaad dooneyso inaad hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Diiwaannada Guud ee Tayada, inaad hesho xogta lagaa hayo, inaad dalbato in xogta lagaa saxo ama la xaddido ama in xogtaada keydka laga saaro waxaad la xiriiri kartaa annaga ama gobolka ka mas'uulka ah diiwaankaas isaga ah.

Waxaad faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan Diiwaannada Guud ee Tayada ka akhrisan kartaa www.kvalitetsregister.se.